

# Waqtii hore qaado tallaaladii laga maqnaaday!



## Sanad Dugsiyeedka 2024-2025

Sharciga Oregon ayaa faraya in carruurtu qaataan tallaaladooda loogu talagalay dugsiga iyo daryeelka carruurta. La xiriir dugsigaaga, daryeelka carruurta, ama bixiyaha caafimaadka si aad u ogaato in ilmahaagu joogo waqtigii uu tallaalada qaadan lahaa.

### Waqtiga kama dambeysta ah ee loogu talagalay sanadkani

**Janaayo 15, 2025**

Si aan loo helin warqad wax la  
iskaga reebayo

**Febraayo 19, 2025**

Si aan la iskugu diidin dugsiga  
ama daryeelka carruurta

**Ha  
sugin!**

**Waxaad diiwaannada la cusbooneysiiyay  
hadda u keeni kartaa dugsigaaga ama  
daryeelkaaga carruurta.**

Waqtii hore kaalay si aad iskaga ilaaliso  
waqtiyada la sugayo rugta caafimaadka!

### Halkee bay carruurtu tagi kartaa si ay u qaataan tallaalada?

- Dhakhaatiirta carruurta
- Dhakhaatiirta qoyska
- Farmashiyayaasha (7 jir iyo ka weyn)
- Xarumaha caafimaadka ee dugsiga ku-salaysan
- Waaxyaha caafimaadka
- Rugaha caafimaadka ee aan faa'iido doonka ahayn

\*Haddii aad doonayso in lagaa caawiyo helitaanka dhakhtar, 211 Info ayaa ah meel fican oo wax laga bilaabi karo. Iyaga oo ku takhasusay caafimaadka iyo caawimaada u adeegida bulshada, waxaa lagala xiriiri karaa [help@211info.org](mailto:help@211info.org) ama iyada oo la wacayo 2-1-1. Turjumaanada luqadda ayaa la helayaa.

Wax iska reebitaan ayaa sidoo kale la helayaa.